



## 10 Siyood oo laysugu diyaariyo Xanaanada

1. Abuur caado nololeed waqtiga kulaylaha. U samee ilmahaaga waqti lagu seexo (8:00 galabti waa heer sare!) oo ku adkayso.
2. Ilmahaaga bar siduu magaciisa hore u qoro marka ugu horaysa. Haduu ilmahaagu yaqaan siduu taas u sameeyo, ku day magaca ugu dambeeya, ama tababar ku sii qorida xarfaha yaryar.
3. Isticmaal tirinta hawlo maalmeedka. Tiri inta talaabo ee ku tago sanduuqa boosta ama beerta cayaaraha. Tiri khudaarta, dermaha goglan, tiwaalada faraha, iyo wax la mid ah.
4. Ilmahaaga u kaxayso dukaanka, xafiiska boosta, makt abadda, iyo meelo hawleedka kale. Kala hadal waxa ay arkaan, maqlaan ama taabtaan. *Giddi waa ka mid waaxbarashada!*
5. Booqdo maktabadda xaafadda oo ilmahaaga ku caawi sidii u helo kaar maktabadeed oo bilaash ah. Kadib u isticmaal kaarka si loo booqdo maktabadda wiig kasta oo looga soo dayn sado bug. Waxa la akhrisan karo waxa laga helayaa: [www.countdowntokindergarten.org/activities](http://www.countdowntokindergarten.org/activities)

Ka hadal buugagta aa akhriso. Weydii su'aalaha sida:

- Qaybtee sheekada ugu jeclayd?
- Qaybtee baadan u jeclayn?
- Sheekada kala barkeeda, weydii Ilmahaaga siday u malaynaayan in sheekadu ku dhamaanayso?

Ma ogtahay inaad rukhsad BILAASH ah ka qaadan karto maktabadda xaafadda ood ku tagto matxafyada idiin dhow?

Liiskani wuxu ku haboon yahay caruurta u dyaarsan inay galaan xanaanada K2. Hadii ilmahaagu ka yar yahay, ku tala gal inuusan/inayan diyaar u ahayn samaynta hawlahaan idil.

6. U ogolow Ilmahaaga inay bartaan madax banaaniidooda adoo u ogolaanaya inay xulashooyinka qaarkood iskood u sameeyaan ("Ma waxad rabtaa tufaax mise moos?"), iyo adoo ku dhiiri gelinaya inay tijaabiyaan waxyaabo cusub iyo sidii xal loogu heli lahaa.
7. Xad u samee waqtiga ilmahaagu daawado TV-ga (1-2 saacadood ugu badnaan). Markay suurto gasho, la daawo TV-ga kalana sheekayso waxad aragteen.
8. U diyaari Ilmahaaga "barta waxbarasho" oo laga helo laabisyo midab leh, waraaqo, maqas, iyo "qalabka" kale ee xanaanada. Waqti gooni ah ugu tala gal inuu ilmahaagu maalin kasta meeshaas wax ku sawirto. Marka dugsi bilawdo halkaasi waxay noqonaysaa waqtiga iyo meesha ilmahaagu ku sameeyo shaqo guriga.
9. Ku caawi ilmahaaga inuu ogaado ama awood u helo inuu sammeeyo waxyaabaha soo socda intuu xanaanada gelin:
  - Magacooda, cinwaanka, iyo lambarka telafanka
  - Isticmaalka musqusha ee iskood iyo xidhashada iyo xiridda guluusyada iyo sibka dharkooda.
  - Wax la qaybsashada iyo la cayaarka caruurta kale. Taasia waxay ku caawinaysaa inay la qabsadaan fasalkooda cusub ee xanaanada.
10. Akhri, Akhri, Akhri!  
(Af Ingiriisi ama afka hooyo!)

Wixi talabixin caawimo dheeraad ah, booqo

[www.countdowntokindergarten.org](http://www.countdowntokindergarten.org)



Warqaddan talabixinta waxa diyaarshay koox ah macalimiinta xanaanada iyo dugsi kahor waana qayb ka mid ah mashruuca "Boston Making Connections", oo ay taageeraan Matxafka Caruurta Boston iyo Ushintiriska Xanaanada waxana maalgeliya Adeegyada Machadka Matxafka iyo Maktabadda.

